

Oktoobar 23, 2023

Waxbarashada Chevron Fuels STEM ee Dugsiga hoose Hightower oo leh \$10,000 oo Deeq Waxbarasho ah

Hal abuurka ayaa helaya taageero badan kadib deeq 10,000 oo deeqda waxbarashada DonorsChoose ee ka imaaneyso Chevron. Ardayda dhigata Dugsiga hoose Hightower waxay hadda helayaan aqabyo badan oo waxbarasho ah iyo illo lagu balaarinayo malaawaalkooda ee caalamka xiisaha leh ee waxbarashada Sayniska, Tejnoolijiyada, Injineernimada, iyo Xisaabaha (STEM).

Oktoobar 18 ka, Chevron waxay u soo bandhigtay dugsiga deeq, taasoo wehliyo Maamule Hightower Shelia Price iyadoo u mahadnaqeyso oo u muujineyso mahadnaqeeda Chevron oo iskaashigooda deeqsinimada leh.

“Waan ku faraxsannahay deeqdaan. Waxaan iskaashato la aheyn Chevron oo sannooyin badan,” Maamule Price ayaa tiri. “Waxay marwalba taageereen dugsigeena, halkaan ayay ka joogaan xaafada, oo marwalba dib ayay noogu soo celiyaan, oo waxaan rabaa inaan dhaho mahadsanidiin.”

Dugsiga hoose Hightower wuxuu haystaa shahaado sharafeed sida dugsiga STEM ee Cognia, oo ah urur caan ah oo aan faa'ido doon aheyn oo ay ka go'antahay inay aqoonsadaan dugsiyada hoose iyo sare ee caalamkoo dhan. Maamule Price way aqoonsantahay caqabadaha gaarka ah ee lagu soo bandhigayo afkaaraha waaritaanka ee ardayda dugsiga hoose.

“Hubinta inaan haysano waxaan u baahannahay si aan ugu soo bandhigno agabka ardaydeena da'daan waa mid aad muhiim u ah. Deeqdaan ayaa si weyn noo caawineyso,” waxaa tiri Gabar Price. “Waxaan u iibin karnaa aqabyo, saadad, iyo waaya aragnimo ardaydeena si markaas ay ula kulmaan shaqooyinka STEM oo ay u ogaadaan waxa halkaas ka jira iyo waxa loo heli karo. Waxaan isku daynay inaan isticmaalno dhibaatooyinka caalamkoo dhan si aan ugu soo bandhigno, oo waxay la yimaadaan qaabab hal abuur leh ee lagu xaliyo dhibaatooyinkaas.”

DonorsChoose waa urur aan faa'ido doon aheyn oo u ogolaanaya shaqsiyaadka inay si toos ah ugu deeqaan mashaariicda fasalka dugsiga dadweynaha, kaasoo siiya qaab sahlan oo Chevron ku sii wado howlgalka lagu taageerayo ardayda iyo macalimiinta dugsiyada dadweynaha. Tan iyo 2021, Chevron waxay maalgelisay ku dhawaad \$3.5 milyan oo waxay maalgelisay ku dhawaad 4,300 mashruuc, taasoo si qoto dheer ah u saameysay fasalada dalkoo dhan.

Si kastaba, balanqaadkeeda wuu sii socdaa. Chevron wuxuu soo bandhigayaa \$100,000 oo deeqda waxbarashada DonorsChoose dugsiga degmooyinka la aqoonsaday ee Florida, Georgia, iyo Texas. Amy Brandenstein, Wakiilka Arrimaha Bulshada ee Chevron Pascagoula Refinery, ayaa ammaantay ka go'naanta Dugsiga hoose Hightower ee waxbarashada STEM.

“Waxay sameeyaan waxyaabo u fiican carruurta. Haljeer bishiiba, waxay diirada saarayaan tijaabooyinka sayniska iyo mashaariicda kaa caawineyso xalinta dhibaatooyinka dhabta ah, taasoo cajiib ah in lagu sameeyo heerka dugsigga hoose,” waxaa tiri Gabar Brandenstein. “Waad ku ammaanantihiin siinta ardayda fursadahaan fiican, oo waan ku faraxsannahay inaan noqono lammaane.”

Maamule Price ayaa sheegtay inay uga mahadcelineyso kafaala qaadka deeqsinimada shirkada oo waxay hoosta ka xariiqday inay balaarineyso waxbarashada ardaydeeda iyadoo siineysa qalabyo, aqoon, iyo dhiirogelin ay ku kobciyaan maadooyinka STEM.

XXX